



CVOEO Fair Housing Project

Guide to Fair Housing in Vermont

Jidka caddaalad ku raadista
guryaha ee Vermont



Somali

Maxay tahay caddaalada guryaha?

Waxa ay tahay xuquuqda aad u leedahay sinnaanta curyaha.

Caddaaladaguryuhu waxa ay tahay waxa aad xaq u leedahay inaad :

**Inaad ijaarato
libsato**

adigoo aan lagugu xaqirin ama lagugu samayn midab kala sooc.

Waxa aan la ogolayn ama mamnuuca ah.

Waxa ka mid ah:

in lagu xaqiro, in lagaa diido in guri lagaa ijaaro, in lagaa diido in lagaa gado guri, in lagaa diido inaad guri dawladeed inaad dalbatid.

In lagu yidhaahdo annagu ma aqbalno ee qoladaa kale u tag.

In laguula dhaqmo si aan habbonayn ama lagu hadido.

In lagu yidhaahdo wax aan haynaa ma jirto iyada oo ay jiraan guryo bannaan.

In la soo saaro qoraal ama xayaysiis caddaynaysa wax ku xad gudbaysa xuquuqda shaqsi xaq uu u leeyahay.

In laguu hanjabo, laguu caga jugleeyo, ama faraha la galaan arrimahaaga oo ku lug leh xaq darro.

Xuquuqaha oo la ilaaliyo waxaa ka mod ah

Federaalka

Jisiyad

Midab kala sooca

Diinta

Qofku meeshuu ka yimid asligiisii

Lab ama dhaddig

Qoysaska

Dadka laxaadka la'

Cobolka Vermont

Da'da

Qoyska hal waalid joogo

Lab ama dhaddig

haddii uu mucaawimo ka qaato

dawladda lab ama dhedig

Dadka qata macawimada duwlada

Dadka qaata mucaawimada dawladda dexe kuwa go-boleed ama Federaalka

Sida. Caafimaadka ama guryaha dawladda. Haysta wa-raaqda Section 8.

Midabka kala soocu waxaa uu u dhigmaa ama uu mata-laa...

“Cidka kale lacagta ijaarka kama qaadano oo aan ahayn cidda guriga noo sexeexda mooyee.”

“Section 8 ma qaadano.”

“Waxaan rabnaa dadka ladan oo kaliya, dadka walfeer-ka qaata ma rabno.”

Qofka guriga leh ama kambaniga ah waxa ay xqa u leeyihii in ay baadhitaan kugu soo sameeyaan meelihii aad horey u soo daganaan jirtay.

- In ay la hadlaan dadka aad sheegatay oo ay kaa waraystaan inay ku yaqaanaan.
- In ay la hadlaan shaqsigii ama kambanigii aad guryaha kaga jiri jirtay.
- Ina aay si caddaalad iyo sinaan leh u shaqeeyaan.
- In macaamilkoodu ahaado shaqo guryeed oo kaliya



Xaq darro qoyseed

Qoysaska xaq darrada lagu sameeyo waxaa kamid ah:
Kuwa caruurta leh, kuwa leh caruurta 18 jir ka yar,
haweenayda uurka leh, dadka korsada caruurta aysan
dhalin.

*Xaq darradu waxay u qeexan tahay sidan hoos ku
qoran...*

“Guryan caruurta uma fiicna, jaran jarooyin bay leeyihi-in guryahani.”

“Guryo sunta rinjiga leh oo lagaa ijaaro iyaga oo og.”

“Waxaa lagaa rabaa \$ 100 oo dhiboosit ah cunuggiiba caruurta cidda leh ma oggolin.”

Midda kalewaxaa xaqiiqa in lagu seexan karo laba qof qolkiiba haddii ay fuliyaan sharciyada nabed gelyo.
Magaaladan Barlington waxaa ka jira sharciga degenaanshaha guryaha. Haddii aad su'aal qabto la xidhiidh laanta sharciyada guryaha ama hay'adda xaq raadista guryaha.



Laxaad la'aansho

Waxa qofka lagu sheegaa inuu yahay qof laxaad la':

Haddii uu maskaxda wax ka qabo ama isku filnayn

Haddii uu caryaan yahay

Haddii uu xanuun wayn qabo oo uu sariir yaallo oo
u baahan mucaawimo



Waxaa kaloo looga baahan yahay caddayn inuu laxaad laayahay ama waxba qabsan karay, ama dad kale oo badani qabaan inuu san waxba qabsan karayn. Shuruucda guryaha u yaalla.

Qof laxaad la'aani haysato waxaa uu xaq u leeyahay inuu codsado is baddal xaga shuruucda guryaha si ay ugu hirgasho baahida uu qabo. Haddii aad mucaawimo xagga guryaha aad u baahan tahay waxaad la xidhiidhaa laanta xaq raadista guryaha si ay kaaga caawiyaan baahidaada.

Xaqqaaga raadso!

Laanta xaq raadiska guryaha, waxa aad xaq u leedahay guriga aad jeceshahay haddii aad buuxiso shuruucda u yaalla guryahaas.

SO WAC:

CVOEO Fair Housing Project

Laanta xqa raadista guryaha
Sooa wac (802) 864-3334 Ext. 202
ama 1800-287-7971

Vermont Human Rights Commission

Laanata xuquuqal insaanka ee gobolka
Vermont Telefoonkooduna waa 1-800-416-2010
ama 1-802-828-2480

Vermont Legal Aid

Laanta kaa caawisa shuruucda ee gobolka Vermont Telefoonkooduna waa 1-800-889-2047

HUD Fair Housing and Equal opportunity

Laanta Federaalka ee Gurayaha iyo sinnaanta
1-800-245-2691 (GENERAL INFO)
1-800-669-9777 (COMPLAINT HOTLINE)



Buuggan waxaa qoray Laanta CVOEO Caddaaladda gu-ryaha iyagoo kharashka ku baxay ka helay laanta fed-eraalka guryahay iyo kobcinta bulshada.



FHP waxa ay ku hawl galeen la dagaallanka midab ka-la sooca guryaha gobola Vermont iyagoo la kaashanaya shuruucda guryaha cilmiyeeynta ummadda san-nadku markuu ahay 1995kii.

CVOEO Fair Housing Project

**Laanta xuquuq ku dhaqanka guryaha oo adarayskoodu
yahay:**

255 S. Champlain St.

Burlington, VT 05401

Telefoonkooduna waa:

(802)864-3334 Ext.202 ama 1-800-287-7971

Web sitkooduna waa: www.cvoeo.org



CVOEO Fair Housing Project